



# Adeegyo degdega ah oo takhasus ah

## ISBEDDELKA ADEEGYADA COVID-19 DARTEED

Adeegyada degdega ah oo takhasuska ah ayaa sii socon doona inta lagu jiro faafka COVID-19. Si kasta ha ahaatee, siyaalaha loo bixiyo adeegyada ayaa laga yaabaa inay isbeddelaan iyada oo waafaqsan talada sarkaalka caafimaadka.

Fadlan si toos ah ula xirii adeegbixiyahaaga (**service provider**) si aad ugala hadasho qorshayaasha cusub.

Baro wixii ku saabsan **COVID-19 iyo astaameheeda**.

## Dusha kala-socodka

Barnaamijka Dejinta Habka-Aaadmiga [Humanitarian Settlement Program (HSP)] waxa uu siiyaa Adeegyada degdega ah oo takhasuska ah (SIS) waxa uu siiyaa samafal dadka soo galootiga ah iyo dadka kale ee haysta fiisaha ee qaba baahiyaha adag.

SIS waxay siisaa macaamiisha kaalmo ku salaysan baahida si looga caawimo iyaga inay helaan adeegyada asalka ah ee ku haboon ayna yeeshaan xirfadaha loo baahan yahay oo lagu maareeyo baahidooda si madaxbanaan. SIS waxaa bixiya Bixiyeyaasha Adeegga HSP iyagoo ka wakiil ah Waaxda Arimaha Gudaha (waaxda).

Adeegbixiyaha HSP goobaha iridaha iyo meesha lagala xirirayo waxaa **laga helaa halka**.

## Mudnaanta

Kuwa haysta fiisoyinka soo socda ayaa laga yaabaa inay xaq u leeyihiin SIS:

- Qaxooti (subclass 200, 201, 203 and 204)
- Habka Aadamiga ee Caalamiga ah (subclass 202)
- Xafidaad (subclass 866)
- Xafidaad ku Meelgaara (subclass 785), Joogitaan Aadami oo ku meel gaar ah (subclass 449), Welwelka Aadamiga ku meelgaara (subclass 786) Iyo Safe Haven Enterprise (subclass 790).

Kuwa haysta fiisoyinka ayaa laga yaabaa inay mudan yihiin SIS ilaa shan sanadood kadib markay Australia yimaadaan, ama shan sanno kadib markay xaq u yeeshaan fiisada.

Duruufaha gaarka ah, dadka heysta fiisoyinkan ayaa laga yaabaa inay u qalmaan SIS wixii ka baxsan waqtigaan ama uqalmidda waxay la siin karaa kuwa haysta noocyada kale ee fiisaha. Muwaadiniinta Australiyaanka ahi xaq uma laha SIS.

Kuwa xaqa u leh SIS waxaa waajiba inay muujiyaan awood la'aanta inay si madax banaan ula fal galaan kaalmooyinka ku haboon ayna saameeyeen caqabada kala duwan ama xayn daabyo ay ka mid yihiin:

- Iinta
- Baahiyaha iinta aad u daran, khatarta ah, mudada dheer iyo/ ama aan la maarayn karin
- Arrima caafimaad maskaxeed
- Guri la'aan ama ku-tashi la'aanta guri
- Guriga ama rabshada qoyska
- Welwelka samaqabka dhalinyarada iyo ilmaha
- Qoyska iyo/ama burburka guurka
- Ka go'naanta bulshada
- Dhibaato dhaqaale
- Arrimaha sharci

## **Ayaa qof u diri kara SIS?**

Urur ama shaqsi kastaa wuxuu u diri karaa qofka SIS. Tan waxaa ka mid ah is-gudbin.

## **Sidee loogu xawilaa qof SIS**

Si loogu xawilo qof SIS, fadlan buuxi foomka online ah (**SIS Referral Form**).

Haddii aadan hubin inuu qofku u qalmo SIS, ama haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad u buuxiso foomkan, fadlan la xiriir khadka wax weydiinta ee SIS adoo wacaya 1300 855 669 inta lagu gudajiro saacadaha shaqada AEST (Australia gudaheeda waa bilaash).

Haddii ay ku haystaan dhibaatooyin farsamo xagga buuxinta form-ka online-ka ah, caawimo waxaa laga helli karaa iyada oo la wacayo HSP Barta kaalmada saacadaha shaqada lagu jiro 1800 020 283 ama habka iimaylka [hspsystem.helpdesk@dss.gov.au](mailto:hspsystem.helpdesk@dss.gov.au).

Haddii aadan awoodin inaad hesho foomka xawilaada ee online-ka ah waxaa laga yaabaa inaad buuxiso (**paper version**).

## **Maxaa dhacaya marka xawilaada la soo gudbiyo**

Marka waaxdu hesho foomka oo dhammaystiran, waxay qiimayn doontaa uqalmidda qofka (dadka) la soo gudbiyey waxayna ogeysiin doontaa tixraaca go'aanka. Haddii qofka (dadku) la helo inuu/ inay ku qanceen shuruudaha u qalmida ee SIS, Waaxdu waxay hawlgalin doontaa Adeeg Bixiye HSP si ay u gaarsiiso SIS qofka (dadka).

Intay ku qaadanayso loo-adeeguhu inuu hello SIS waxay ku xiran tahay baahida shakhsiyeed, laakiin badanaa waa ilaa lix bilood.